Somali

Imtixaanka Gobolka Washington: Darajada Fasallada 3-8

Ardayda ku jirta fasallada 3-8 inta ugu badan ayaa ka qaaadan doona Qiyaasaha Horumarka Aradayda (MSP). Qiyaastii boqolkiiba hal ayaa ka qaybgali Imtixaannada Habka u Dhigma Qiyaasta Ardayda Washington (WAAS), oo barnaamij u digma midka hore oo ay galaan ardayda barnaamijka waxbarshada qaaska ah.

Magaca MSP ayaa xanbbaarsan himilada imtixaanka: Si *loo qiyaaso horumarka ardayga*. Imtixaanka gobolku waa inuuna noqqon waxa kaliya ee xukuma xirfadaha iyo aqoonta tacliinta ardayga. Waxqabadka ardaygu siday u dhan yihiin waa in la qaddariyaa. Haddii wax su'aalo ah aad ka qabtid ilmahaaga waxbarashadiisa, fadlan la xiriir macallinka ama dugsiga ilmahaaga.

Imtixaamitaanka Gobolka Su'aalaha inta Badan la Warsado (FAQ)

Waa maxay noocaca su'aalood ee ku yimaad imtixaannada gobolka?

Aqriska, xisaabta iyo sayniska MSP-ga waxa ka mid ah su'aalo jawaabaha la kala doorto leh iyo su'aalaha jawaabta gaaban u baahan. Su'aalaha afarta-dhibcood la siinayey ayaa laga daayey imtixaannada akhriska, xisaabta iyo sayniska. Wax ka beddelkan ayaa u oggolaaneysa ardaydu inay muujiyaan inay karti u leeyihiin xallinta masalooyinka, iyaga oo aan marka dhibco lagu siin kartidooda qoraalka. Waxaan leenahay imtixaan MSP oo qoraal ah fasllada 4aad iyo 7aad.

Fadlan booqo www.WAtesting.com si wax dheerad ah aad uga ogaato waxa ku saabsan imtixaanka gobolka.

Ku Wareegga Imtixaanka Onlineka ah

Washington Maaha gobolka ugu horreeyey ee ku dhaqaaqa in imtixaan lagu qaadi intarnatka, laakiin waxay ku jirtaa hogaamiyayaasha. Ujeedada Gobolku waxa weeyaan in inta badan ee ardayda iskuulka dhexe iyo ka hoose ee waxakhriska iyo xisaabta, iyo sayniska, imtixaanka lagaga qaado dhinaca combiyuutarka ee dhamaan isguulada ka hor taariikhda 2014.

Waqtiga kuleylihu soo galayo ee 2012, imtixaanka MSP, ee fasalada 3-8, waxa lagu qaadi-doonaa intarnatka, iyada oo fasalada 3aad ay noqon-doonto markii ugu horeysay. Cilmi-baadhis ayaa lagu sameeyay sidda ay u suura-gali-karto in imtixaanka lagu qaado intarnatka, ee arrimaha la xidhiidha qoraalka fasalada 4aad illaa kuwa 7aad, ee casharada qoraalka.

Yaa Imtixaanka Laga Qaada Iyo Goorma?

Sharciga federaalka ah ee Ilmana Ayaan laga Tagin ayaa u baahn in sannad kasta lagu imtixaamno ardayda darajada fasallada 3-8 iyo 10 akhriska iyo xisaabta, iyo saddex darajo fasal (fasallada 5, 8 iyo 10 Washington gudaheeda). Gobolkeenu waliba waxa u ku imtixaamaa ardayda qoritaanka (dajada fasallada 4, 7 iyo 10). Gobolkeena ayaa waliba u guuray dhinaca imtixaamidda onlaynka.

Fasalka	3-aad	4-aad	5-aad	6-aad	7-aad	8-aad	9-aad	10-aad	11-aad	12-aad
Aqrinta	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	NT	✓	*Loo baahan yahay kaliya haddii u ardaygu la kulmin waxa looga baahan yahay qiimaynta qalin-jabinta gobolka.*	
Xisaabta	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	✓	✓		
Qoritaanka		✓			✓		NT	✓		
Sayniska			✓■			✓■	✓	✓		

■ Lagu bixin doono online markay tahay guga 2012

NT Mawduuca casharka aan la imtixaamin (fasalada 9aad oo kaliya ayaa qaadandoona imtixaanka dhamaadka tacliinta ee xisaabta iyo culuumta, haddii ay duruusdaa dhigtaan).

FASALKA 5

Jadwalka Warbixinta iyo Imtixaanka Gobolka

Abriil 27-Maayo 18:	Daaqadda imtixaanka MSP-ga waraaqda/qalin-rasaaska ee loogu talagalay darajo fasallo 3-8*
Abriil 27-Juun 4:	Mudada imtixaanka lagu qaado ee fasalada 3-8*
Illaa bartamaha Sebtemeber:	Dhamman warbixinaha MSP ayaa guriga loo soo dirayaa

* Imtixaanku waa hal maalin cashar kasta markay tahay aqriska, xisaabta iyo sayniska

Waa maxay micnaha dhibco natiijo (score) ee MSP?

Ardayda ayaa ka hesha dhibco natiijo (score) imtixaan kasta MSP oo ay qaataan. Darajeeyntaasina waxay ku saleeysan tahay sida uu ardaygu uga soo baxay imtixaankaas, sidaas la adligeed kuma aad arki doontid boqolayda badanaaba aad ku aragto imtixaanada kale. Darajeeyntuna waxay noqotaa mid ka mid ah xadadkaan:

Xadka **4** — **Dhaafay Xadka Gobolka:** Muujinaysaa xad sare oo ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.

Xadka **3** — **Soo Buuxiyay Xadka Gobolka:** Muujinaysaa xad sare oo ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.

Xadka **2** — **Ka hooseeya Xadka Gobolka:** Muujinaysa qaar ka mid ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.

Xadka **1** — **Aad uga hooseeya Xadka Gobolka:** Muujinaysa inuu bartay wax yar oo ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.

Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200

For more information
OSPI: www.k12.wa.us
MSP/HSPE: www.WAtesting.com
Su'aalaha: StateTesting@k12.wa.us

August 2011